Australian Government

Department of Immigration and Citizenship

Macluumaadka degitaanka ee loogu talagalay soogalootiga imanaya Australiya

Form
994i SOM
SOMALI

Waxaan kuugu hambalyeynaynaa go'aankaaga ah inaad u soo haajirto Australiya. Waxaan kuu rajeynaynaa wanaag waxaana rajeynaynaa inaad ku faraxsanaan doontid gurigaaga cusub.

Foomkani wuxuu qorayaa gabagabo yar oo ku saabsan meelaha muhiimka ah oo la doonayo inaad tixgeliso markaad bilaabeyso noloshaada cusub ee Australiya. Waxaana laga helayaa website ka Wasaaradda Socdaalka iyo Dhalashada (Wasaaradda) isagoo Ingiriis ah iyo 37 luuqadood ee **www.immi.gov.au/allforms/languages/languages_num.htm** Dadka soogalootiga ah badidoodu ilsha ugu weyn ee ay ka helaan macluumaadkooda waa qaraabada, saaxiibada iyo ciddii ay kala xiriiraan Australiya. Wixii daraasad dheeraad ah ee aad awoodo inaad sameyso ka hor intaadan iman waxay kor u qaadeysaa degitaankaaga.

Boggaga websita-dada Wasaaradda ee *ku noolaanshaha Australia* waxaa laga helayaa **www.immi.gov.au/living-in-australia/** waxayna bixisa faahfaahin badan oo ku saabsan macluumaadka dejinta oo ay ku jiraan adeegyada ay heli karaan soogalootiga dhawaan yimid.

Buugga yar ee *ka bilaabida nolol Australia* waxaana lagu heli karaa af Ingiriis iyo 37 af bulshadeed. Waxay ka kooban tahay macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan adeegyada soogalootiga dhawaan yimid iyo kuwa la filayaba. Waxaana laga heli karaa website ka ah **www.immi.gov.au/living-in-australia/settle-in-australia/beginning-life/**

Bulshada kala duwan ee Australia

Australia waa dad leh aqbalaad, bulsho kala gedisan oo leh dad ka soo jeeda asalo badan oo kal duwan oo dhaqameed, jinsiyadeed, afeed iyo diimeedba. Australiyaanku waxay ka kala yimaadeen dhammaan geesaha aduunka. Qiyaastii boqolkiiba 44 Australiyaanku waxay ku dhasheen dibeda ama waxay leeyihiin waalid ku dhashay debada.

Australian ku waxay heystaan diimo kala duwan. Qof waliba waa u xor inuu sheegto heystaana caadooyinkiisa diimeed iyo dhaqanba, sida sharcigu ogol yahay, wana ka qayb geli karaan waxna lahaan karaan Australian ahaan. Marka ugu horeysa, waxaa laga yaabaa inaadan u baran kala duwanaantanta oo kale. Laakiinse haddii aad tahay qof furfuran oo xushmeeya dadka, fikradaha iyo caadooyinka, waxaa laga yaabaa inaad ku haboon tahay oo aad ku guleysato noloshaada cusub.

Xoriyada iyo sinnaanta aan ku raaxeysaneyno Australia gudaheeda waxay ku xiran tahay qof walba oo fuliya waajibaadkiisa. Waxaa lagaa rajeynaynaa inaad daacad u ahaato Australia oo aad taageerto hab nololeedkayaga diimoqraatiga ah iyo qiimaha uu wato. Oo aad ka caawiso Australia inay heysato caadadeeda aqbalaada, ka mid dhigida iyo cadaalada dhammaan la siinayo. Waxaa jira sharciyo ay leedahay dawlada dhexe, ta gobolka iyo territoriga kaas oo diidaya midab kala sooca ku saleysan siyaalo badan (sida jinsiyada, jinsiga, iinta, da'da ama doorbida galmada) iyo meelo kala duwan oo badan oo ka mid ah nolosha dadweynaha (sida shaqada, waxbarashada, hoyga, isticmaalka alaabta iyo adeegyada, iyo falalka dawliga ah).

Ingiriisku waa afka qaranka, in kastoo ay jiraan wax ka badan 260 luuqadood oo Australiya lagaga hadlo, oo ay ku jiraan afafka dadka dalkan loogu yimid, ee lagaga hadlo Australiya. Haddii aadan ku hadli karin Ingiriis waxaan si aad ah kuugu dhiirigelinaynaa inaad isla marka aad timaadaba baratid. Waxaana laga yaabaa inaad xaq u yeelato fasal bilaash ah adoo adeegsanaya Barnaamijka Ingiriiska ee Dadka Soogalootiga ah (AMEP). Faahfaahinta ku saabsan barnaamijkan waxay ku taallaa bogga 5aad.

Karantiinka iyo kastanka

Safaaradda Australiya ayaa ku siineysa macluumaad ku saabsan shuruucda karantiinka iyo kastanka. Wuxuu kuu sheegi doonaa waxaad keeni karto iyo waxaadan keeni karin Australiya, xaaladaha khaaska ah ee aad ku soo qaadan karto alaabtaada guriga, xayawaanka/alaabta xayawaanka, iyo cashuurta kastanka wax ku saabsan. Wixii macluumaad dheeraad ah gal: www.customs.gov.au

Lacagta iyo Bangiga

Waa inaad sameysataa jeega qofka safraa qaato ama lacagaha kale sida US ama dollarka Australian kahor intaadan safrin.waxaad ku bedelan kartaa lacagaha qalaad lacagta Australia badiba gegida diyaaradaha caalamiga ee diyaaradaha ee Australia.

Dadka badanaa waxay ku keydsadaan lacagtooda bangiga ama hayadaha kale ee lacagta. Haddii aad ka furato xisaab hayadahan mid ka mid ah 6-da toddobaad ee ugu horeysa markaad timaado, waxaad caadi ahaan u baahaneysaa oo keliya baasaboorkaaga. 6 toddobaad ka dib waxaad u baahaneysaa aqoonsi dheeraad ah si aad u furato xisaab bangi.

Gaadiidka

Waxaad u baahan doontaa inaad hesho gaadiid kaa soo qaada gegeda diyaaradaha oo ku keena hoygaaga. Waxaa jira tagaasi iyo basas dhammaan gegooyinka caalamiga iyo kuwa kale badidoodaba.

Si aad gaari u kaxeyso, waxaad u baahan tahay laysanka Australiya. Laysanka Caalamiga ah waxaa laga yaabaa in la aqbalo wakhti gaaban. Kala xiriir wasaarada gaadiidka ee gobolka ama territoriga kuugu dhow wixii macluumaad ah ee ku saabsan helidda laysanka baabuurta. Buugga teleefanada ee xaafadda ayaa qoraya wakaaladaha khuseeya faahfaahinta cinwaanada aad kala xiriirka.

Adeecid la'aanta sharciyada gaadiidka waxay sababi kartaa ganaaxyo qaali ah, luminta laysanka gaadhiga ama xitaa xadhig. Shuruucda Australiya gudaheeda way adag yihiin waxyaalaha la xiriira xaddadka xawaaraha iyo kaxeynta gaadhiga ka dib markaad aalkolo cabto. Waa sharci darro inaad cabto aalkolo ama aad sarkhaansan tahay adoo gaadhi wada. Shuruucda Australiya waxay sheegayaan in qof kasta oo ku safraya gaadhi waa inuu isticmaalaa suunka kursiga ama kursiga ilmo xejiyaha.

Guriyenta

Si aad u kireysato/iibsato guri/ falaat, waxaad ka heli kartaa waxa ku qoran ee lagu xayeysiiyey wargeysyada, internetka ama wakiilada guryaha kireeya. Debaaji bixinta, la mid ah bil lacagteed, iyo bil lacagteed oo la hor marinayo ayaa badanaa la qaadaa marka wax la kireysanayo. Guriyeynta Australia waxaa laga yaabaa inay noqoto mid adag helitaankeedu kiradeeduna mid qaali ah.

Dugsiyada

Dugsigu waa ku khasab dhammaan carruurta da'doodu u dhaxeyso 5 ilaa 15 sanno. Da'ahan waxaa laga yaabaa inay wax yar isbedelaan gobolada iyo territoriyada qaarkood. Waa inaad ka diiwaan gelisaa ilmahaagaa dugsi sida ugu dhakhsaha badan.

Waxaa sidoo kale la helayaa waxbarashada dugsiga ka horeysa ee loogu talagalay carruurta da'doodu u dhaxeyso 3 ilaa 5 sanno jir. Badanaana waa wakhti dhiman khasabna ma aha iyadu.

Macluumaadka ku saabsan dugsiyada xaafaddaada waxaa laga helayaa Wasaarada Waxbarashada ee Dawladda Dhexe /Tirritoriga. Buuga teleefanada xaafaddaada ayaad ka helaysaa faahfaahinta ciddaad la xiriirayso.

Ammaanka Australiya

Sida dal kasta oo kale, waxaa jira khatar laga leexanayo. Ku dabaalashada badweynta ama webiyada waxay noqon karaan kuwo aad khatar u leh oo xitaa halis ku ah nafta. Xeebaha badweynta, waa inaad ku dabaalataa inta u dhaxeysa calamada jaalaha ah iyo casaanka amase waa inaadan dabaalanba gebi ahaan. Ka kaluumeysiga dhagxaanta badweynta ayaa sidoo kale aad khatar u ah.

'Duurka' Australiya wuxuu leeyahay cayayaan iyo masas khatar ah. Magaalooyinka waaweyn waa inaad ka taxadartaa ammaankaaga shakhsiyeed habeenka intiisa dambe.

© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2011

Kharashka nolol-maalmeedka Australiya

Kharashka nolol maalmeedka Australiya wuu sareeyaa, marka la barbar dhigo dalal kale oo badan. Waa muhiim inaad ka fekerto sidii aad u heli lahaydeen waxaad ku noolaataan adiga iyo qoyskaagu ugu yaraan 2 sanno. Haku fekerin inaad shaqo isla markiiba helayso.

Kharashka guuritaanku wuu sareeyaa. Waxaa jira kharashaad badan oo la xiriira u soo safridda Australiya, soo raridda alaabta guriga iyo taagidda guri cusub.

Adeegyada iyo lacagaha Centrelink

Dawlada Australiya waxay bixisaa adeegyo ay ku caawineyso inay dadku noqdaan kuwo nafsad ahaan isku filan iyo in lagu taageero kuwa u baahan hay'ad loogu yeero Centrelink.

Macluumaadka halkan lagu bixiyey waa mid tusmo guud ah oo kaliya waana inaad baahidaada khaaska ah kala hadashaa Xarumaha Adeega Centrelink.

Waxaad ka heli kartaa Xarumaha Adeega Centrelink iyo lambarada taleefanadooda tusaha taleefanada xaafada. Waxaad la hadli kartaa shaqaalaha Centrelink lagaagana jawaabi karaa su'aalahaaga Luuqad aan ahayn Ingiriis adoo wacaya 131 202. Tani ma aha adeega turjumaaneed. Wecitaanada lambaradan waxaa lagu soo dalacayaa kharashka wecitaanka caadiga ah meel kasta oo Australiya ka mid ah. Wicitaanada laga soo sameeyo taleefanada dadweynaha ee lacagta ah ama taleefanka gacanta waxaa laga yaabaa in lagu dalaco heer ka sareeya.

Centrelink waxay heysaa macluumaad fara badan oo ku saabsan lacagaheeda iyo adeegyadeeda oo ay ku jiraan tiro aad u ballaaran oo ah macluumaad turjuman. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daabacaadaha turjuman ee Centrelink, ka wac 131 202 ama gal website ka ah www.centrelink.gov.au oo dooro 'Waxaan ku hadalnaa luuqadaada' bogga Centrelink.

Wixii ah macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan lacagaha damaanada bulshada ama heshiisyada caalamiga ah ka hor intaadan iman Australiya, waxaa laga heli kartaa:

Website:	www.centrelink.gov.au
Warqad u qor:	Centrelink International Services GPO Box 273 HOBART TAS 7001 AUSTRALIA
Taleefan:	131 673 (Adeegyada Caalamiga ah ee Centrelink ee Australiya gudaheeda) 131 202 (wixii macluumaad ah ee luuqadaha kale ee aan Ingiriiska ahayn) +613 6222 3455 (wixii ka baxsan Australia) (**Ogow**: Haddii aad dooneysid inaad ka soo wacdid Centrelink Adeegyada Caalamiga ah ee bannaanka Australia, lambarada bilaashka ah waxaa laga helayaa dalal badan. Ka eeg website ka Centrelink liiska lambaradan.)

Lacagaha qoyska

Ma jirto xilli sugitaan oo ay leeyihiin lacagaha qoysku ee ka caawinaya korinta carruurta. soogalootiga laftigiisu waxay leeyihiin isticmaalid isla markiiba ah ee daryeelka caafimaad ee hoos timaada Medicare Australiya.

Adeegyada Caawimaada Qoyska waxaa laga helayaa dhammaan xafiisyada Centrelink iyo Medicare. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ay ku jiraan warqadaha xaqiiqda ee luuqadaha badan waxaa laga heli karaa:

Website:	www.familyassist.gov.au
Taleefan:	136 150 (Australiya gudaheeda) 131 202 (wixii macluumaad ah ee luuqadaha kale ee aan Ingiriiska ahayn)

Guud ahaan waxbarashada carruurnimada hore iyo macluumaadka xannaanada carruurta waxaa laga helayaa:

Website:	www.mychild.gov.au
Taleefan:	133 684 (Australiya gudaheeda)

Deganayaasha dhawaan yimid xilliga sugitaankooda

Haddii aad tahay soo galooti ku cusub Australiya guud ahaan ma lihid helitaanta islamarkiiba tooska ah ee lacaga Centrelink.

Sidii deganaha cusub ee dhawaan yimid waxaad badanaa u baahan doontaa inaad sugto 104 toddobaad (Xilliga sugitaanka ee Deganaya dhawaan yimid ee cusub) ka hor intaadan helin badiba lacagaha sida Newstart Allowance ama Youth Allowance.

Waa dheer tahay sida loo xisaabiyo iyo ciddey khuseyso waxay ku xiran tahay imaanshahaaga Australiya iyo lacagahaad dalbatay inaad Australiya joogtay degane Australiyaan ah awgeed wakhti kasta intaad nooshahay waxaa laguu xisaabinayaa xilliga sugitaanka.

Haddii uu ku saameyey Xilliga Sugitaanka Deganaha Cusub ee Dhawaan yimid waxaa muhiim ah inaad isla markiiba la soo xiriirto Centrelink haddii ay xaaladahaagu isbedelaan, tusaale haddii aad ilmo dhasho shaqadu aad lumiso ama aad xannuunsato.

Waxyaalaha laga dhaafayo Xilliga Sugitaanka Degenaha Cusub ee Dhawaan yimid

Waxaa jira tiro laga dhaafayo xilliga sugitaanka deganaha cusub ee dhawaan yimid oo ay ku jiraan haddii aad tahay muwaadin Australiyaan ah ama xubin qoyska muwaadin Australiyaan ah ka mid ah, qofka ku yimid qaxootinimo ama barnaamijka bini'aadanimo ama ah mid heysta fiisooyinka qaarkood.

Haddii ay ku heyso dhaqaalo xumo sababtoo ah xaalladaada oo si weyn isu bedeshay oo xadkaaga ka baxsan waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato Lacagta Khaaska ah. Shaqo luminta ama awoodi la'aanta inaad shaqo hesho guud ahaan looma tixgeliyo inay tahay isbedel xaaladeed.

Waxaa jira sababo dheeraad ah oo ka dhaafa dadka qaarkii xilliga sugitaanka lacagaha qaarkood. Waa inaad ku soo xareysaa dalab Centrelink si aad u tijaabiso inaad xaq u leedahay ka dhaafitaan.

Buuxinta shuruuda deganaanshaha

Lacagaha hawlgabka iyo qaar kamid ah gunooyinka ma laha xilliga sugitaanka ee deganaha cusub ee dhawaan yimid, laakiinse waxay leeyihiin 'shuruuda buuxinta deganaansha:

1. Lacagta Waalidka iyo Lacagta Garoobka waxay leeyihiin buuxinta shuruuda deganaanshaha ah 104 toddobaad.
2. Lacagta Da'da iyo Lacagta Taageerada Iinta waxay leeyihiin buuxinta shuruuda deganaanshaha 10 sanno.

Waxaa jiray qaar laga soo reebayo shuruudahan tusaale , haddii aad tahay qaxooti oo aad noqoto curyaan ka dib markaad timaado Australiya, ama aad ka timaado dal ay Australiya la leedahay heshiiska dammaanada bulshada oo heshiisku daboolayo lacagaha aad dalbaneyso.

Muwaadiniinta New Zealand (ee aan ahayn muwaadiniin Australiyaan ah)

Dadka ku yimaada Australiya baasaboorka New Zealand waxaa badanaa la siiyaa markay yimaadaan Fiisa Qayb Khaasa ah (SCV). SCV kuwa heystaa ee Australiya joogay 26 Febaraayo 2001 waxaa guud ahaan loo tixgelinayaa inay yihiin kuwo ilaashan oo heysta SCV. Kuwa yimid Australiya wixii ka danbeeyey 26 Febaraayo 2001 waxaa guud ahaan loo tixgelinayaa inay yihiin kuwo aan fiisahaasi ilaalineynin.

Dadka heysta SCV waxay xaq u leeyihiin noqoshada deganayaasha australiyaanka ah oo kale waxayna heli karaan lacag bixinada Centrelink oo dhan haddii ay hadda degan yihiin Australiya oo ay qanciyaan xeerarka qaar ka mid ah sida fulinta shuruuda iyo xilliga sugitaanka ee la xiriira.

Dadka baaasaboorka New Zealand heysta ee si joogta ah ugu noolaa Australiya ugu yaraan 10 sanno laga soo bilaabo 26 Febaraayo 2001 ee heysta SCV – ga aan la ilaalineyn waxaa laga yaabaa inay helaan lacag bixin hal mar ah oo ah Newstart Allowance, Sickness Allowance ama Youth Allowance. Haddii ay xaq u yeeshaan lacag bixinta waxaa la sii sameyn karaa xilli ah ugu badnaan 6 bilood.

© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2011

Heshiiska dammaanada bulshada ee u dhaxeeya Australiya iyo New Zealand waxaa laga yaabaa inuu caawiyo qaar ka mid ah muwaadiniinta reer New Zealand in la siiyo Lacagta Da'da, Lacagta Taageerada Iinta ama Lacagta Daryeelaha.

Dadka heysta baasaboorka New Zealand ee degan Australiya waxaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan kaararka lacag dhimista wakhtiga sugitaanka ka dib iyo lacag bixintaba oo ay ka helaan Xafiiska Caawimaada Qoyska.

Dammaanada Taageerada

Dammaanada Taageerada waa heshiis sharci ahaan u dhaxeeya degane Australiyaan ah ama urur (dammaanad qaade) iyo Dawlada Australiya. dammaanad qaaduhu wuxuu ogolaaday inuu siiyo taageero soogalootiga (qofka la daammaanad qaaday) Australiya gudaheeda si qofka dammaanada laga qaaday uusan ugu baahan inuu isku haleyo lacagaha Centrelink. Dammaanada Taageerada waxay ku ekaan kartaa 2 ama 10 sanno iyadoo ku xiran nooca fiisaha ee la siiyey. Haddii adiga iyo kuwa kugu tiirsani aad ka dalbataan lacago Centrelink adoo ku jira heshiiska Dammaanada Taageerada, dammaanad qaadaha waa inuu dib u siiyaa dawlada lacagta oo dhan.

Caafimaadka

Dawlada Australia waxay waxoogaa caawimaad ah ku bixisaa daawada, , kharashaadka tasiilaadka indhaha kharashaadka isbitaalka oo loogu yeero barnaamij la yiraahdo Medicare. Medicare waxay bixisaa daaweyn bilaash ah bukaan socod dadweyne ahaan (Medicare) kaas oo jooga isbitaalka dadweynaha iyo daaweyn bilaash ah ama kharashkeedu hooseeyo ee xirfadlayaasha sida dakhaatiirta, dakhaatiirta takhasuska leh, dakhaatiirta indhaha iyo ilkaha ee ka qaybqaadanaya (adeegyo lacayimay oo kaliya). Haddii aad gaadho ilaa xadka ammaanka ee Medicare ka aad ku heli karto, waxaa laga yaabaa booqashooyika dakhtarkaaga ama baaritaanaduba inay kugu joogaan xitaa wax yar.

Si aad u ogaato inaad xaq u leedahay Medicare iyo inaad iska diwaangeliso Medicare, waa inaad booqataa Xafiiska Medicare ka xaafadaada ee Australia adoo wata Baasaboorkaaga iyo dukumiintiga safarka ama visa deganaasho joogta ah leh. Haddii aadan haysan fisaha deganaanshaha, waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad keento wixii codsi fiiso/laanta socdaalka ah ee aad xareysatay.

Badanaa dadka fiisaha ku meelgaarka ah haysta xaq uma laha inay iska qoraan Medicare ka, si kastaba ha ahaatee waxaa jira waxyaalo laga soo reebayo ayaa jira tusaale dadka codsaday fiisaha deganaanshaha joogtada ah ee fuliya shuruurada lagama maarmaanka ah. Waa inaad booqataa xafiiska xaafadaada ah ee Medicare si aad u ogaato inaad xaq u leedahay iyo in kale. Haddii la fuliyo dhammaan shuruudaha xaq u yeelashada, waxaa lagu siin doonaa lambarka Medicare oo ku meelgaar ah si aad u isticmaasho ilaa intuu kaadhkaagu ku imanayo boosta qiyaastii 3 toddobaad gudahood. Xaaladaha badidooda, adaa iska bixinaya daryeelka caafimaad ka dibna qaar ka mid ah lacagta aad bixisey ayey Medicare kuu soo celinayaa.

Dawlada Australia waxay sidoo kale kaa caawineysaa kharashka daawada qaarkeed iyadoo hoos imaneysa Qorsha Faa'iidada Daawooyinka farmashiiyaha (PBS). Haddii aad u baahan tahay daawo fara badan sannadka, waxaa ku caawin kara PBS Safety net. Isla markaad gaadho PBS Safety Net, uuna farmashiiyuhu ku siiyo kaadhka PBS Safety Net, daawadaada PBS way kuu raqiisnaan doontaa ama bilaash bay kuu noqoneysaa sannadka inta ka hadhay. Haddii aad doorato nooca daawada qaaliga ah ama dakhtarkaagu kuu qoro, waxaa laga yaabaa inaad wax badan bixiso.

PBS iyo Medicare ta waxaa maamula Medicare Australia.

Medicare Australiya waxay maamusha Diiwaanka Tallaalka Carruurnimada ee Australiya. Diiwaan diiwaangeliya faahfaahinta tallaalka la siiyo carruurta da'doodu ka hooseyso 7 sanno. Haddii aad leedahay cunug 7 sanno ka yar, fadlan waa inaad hubisaa inaad soo qaado diiwaanka tallaalkooda Australiya si uu uga caawiyo dhakhtarkaaga Australiya go'aaminta in tallaalkooduna u saxan yahay. Ilmahaaga taariikhda tallaalkiisa ayaa kaa caawin doonta inaad fuliso waxa laga rabo markaad carruurtaada qoreysid dugsiga sidoo kalenana waxay loogu baahan yahay bixinta qaar ka mid ah Caawimaada Qoyska.

Medicare Australiya ayaa maamusha Diiwaangelinta Xubin ku Deeqida Australia (Diiwaangelinta Xubin ku Deeqayaasha). Dadka ka weyn 16 sanno waxay ka diiwaan gelin karaan go'aankooda ku saabsan ku deeqida xubinta iyo unuga Diiwaangelinta Xubin ku Deeqida. Ka diiwaangelinta go'aankaaga Diiwaanka Xubin ku deeqida waa akhtiyaari waxaanad dooran kartaa xubinaha iyo unugyada aad jeclaan lahayd ku deeqidooda. Dadka qaba jirooyinka khatarta ah ama nafka dhawrista ah, waxaa laga yaabaa inuu u yahay xubin ugu deeqidu ama unug ku tallaalidu inay u noqoto fursadii labaad nolosha.

Medicare Australiya sidoo kale waxay maamushaa Qorshaha Ilkaha ee Dhalinyarada. Qorshaha Ilkaha Dhalinyarada wuxuu ka caawiyaa dhalinyarada xaqa u leh ee, jira 12 ilaa 17 sanno , kharashka ka hortaga jeegareynta ilkaha sannadlaha ah. Haddii aad xaq u leedahay, warqad iyo foojar ayaa laguu soo diri doonaa. Jeegareynta ilkaha ee ka hortaga leh waxaa ka mid noqon kara, yareynta iyo nadiifinta, daaweynta floraytka, awaamiirta nadaafada afka, tallada cuntada iyo xirida daloolada ama dilaaca ilakaha.

Medicare Australia waxay haysaa qoraalo macluumaad oo lagu turjumay 19 luuqadood. Qalabkani wuxuu leeyahay macluumaad ku saabsan adeegyada Medicare-ka Australia iyo barnaamijyadeeda iyo adeegyada wuxuuna sharxayaa shuruuda xaq u yeelashada lacagaha kala duwan. Nuqul ka mid ah qalabkan waxaa laga heli karaa website ka Medicare Australia, ama xafiiskaaga Medicare ee caadiga ah ama xafiiska Medicare ee xaafadaada

Wixii macluumaad dheeraad ah:

Website:	www.medicareaustralia.gov.au	
E-mail:	info@medicareaustralia.gov.au	
Taleefan:	132 011*	– Medicare
	1800 020 613**	– Qorshaha Faa'iidada Daawada (Pharmaceutical Benefits Scheme)
	1800 653 809**	– Diiwaanka Tallaalka Carruurta Australia.
	1800 777 203**	– Diiwaanka Xubin ku Deeqaha.
	1800 552 152**	– Kuwa Maqalka iyo hadalkaba wax ka qaba
	131 450*	– Adeegga Turjumaadda Afka iyo Qoraalka
Warqad u qor:	Medicare Australia GPO Box 9822 Caasimadaada	

Caymiska Caafimaadka Gaarka ah

Australiyaan badan ayaa waxay doorteen inta qaataan caymiska caafimaadka gaarka ah. Kani wuxuu daboolaa qiimaha isbitaalada gaarka ah ama kuwa dadweynahaba, waxayna sidoo kale qabtaan adeegyo kale oo aysan qaban Medicare, sida adeegyada ilkaha iyo daryeelka araga badidiisa iyo qaaditaanka ambalaasta. Haddii aad ka fekereyso qaadashada caymiska caafimaadka gaarka ah waa inaad ogaataa waxyaalahan soo socda:

1. Lacag celinta Ceymiska Caafimaadka Gaarka ah - Waxaad xaq u yeelan kartaa inaad dalbato lacag celinta Ceymiska Caafimaadka Gaarka ah haddii aad xaq u leedahay Medicare ayna leeyihiin siyaasad caymis caafimaad oo waafaqeysa oo bixisa daaweynta isbitaalka, daaweynta guud ('saa'id ah ama 'dheeraad') ceymis ama labadaba.
2. Lacagta dheeraadka ah ee lagaaga qaado Medicare - badi dadka Australiyaanka ee cashuur bixiyayaashu ah waxay leeyihiin lacagta cashuurta ah ee Medicare waxaa lagu daraa qadarka cashuurta ah ee ay bixiyaan. Lacagta Medicare ka ee lagaa qaadaa waa lacag dheeraad ah oo laga qaado dadka qaata lacagta ka sareysa ilaa xad loogu talagalay ee aan lahayn caymiska isbitaal gaarka ah. (Sannad xisaabeedka 2011-12) AUD80,000 sannadkii dadka kalida ah iyo AUD160,000 sannadkii lammaanaha ama qoysaska. Bar tilmaameedkan waa la kordhin doonaa si uu ula socodo isbedelka ku dhacaya mushaharka celcelis ahaan.

---

* Wecitaanka kharash ayaa lagaa qaadayaa

** Wecitaanka mobile ka ama taleefanada lacagta lagu rido keliya ayaad kharash bixineysaa

© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2011

3. Ceymiska Caafimaadka ee Noloshaada oo dhan – Ceymiska Caafimaadka ee noloshaada oo dhan (LHC) waa qorshe lacageed oo laga yaabo in la bixiyo iyadoo lagu darayo lacagta aasaasiga ah ee ceymiska caafimaadka isbitaalka gaarka ah. Si aad isaga ilaaliso LHC bixinteeda, waa inaad ka iibsataa ceymiska isbitaalka oo diiwaangashan ka hor intuusan dhicin LHC gaagu. Wakhtiga ugu danbeeyaa badanaa waa 1 Luulyo ee ku xigta dhalashadaada 31-naad, laakiinse soo galooti cusub ahaan Australiya yimid wakhtiga ugu danbeeya ee LHC wuxuu noqon karaa wakhti danbe, iyadoo ku xiran da'daada markaad Australiya timaado.

   Haddii aad iibsato ceymiska isbitaalka ka dib wakhtiga ugu danbeysa waxaa laga yaabaa inaad bixiso LHC – dheeraad ah boqolkiiba 2 ceymiskaaga sannadkasta oo aad ka weyn tahay 30 wakhtiga aad bilowdo ceymiska. Tusaale ahaan, haddii aad sugto ilaa intaad ka tahay 40, waxaa laga yaabaa inaad bixiso boqolkiiba 20 kharashka ceymiska isbitaalkaaga.

   Soogalootiga cusub ee Australiya ee haddaba ka weyn 31 sanno ma bixinayaan kharashka la kordhiyey haddii ay iibsadaan ceymiska gaarka ah ee isbitaalka 12 bilood gudahood laga bilaabo maalinta loo diiwaangeliyo inay xaq u leeyihiin faa'iidada Medicare oo buuxda. Waa muhiim inaad ka fekerto qaadashada ceymiska isbitaalka sannadka ugu horeeya ka dib markaad iska diiwaangeliso Medicare. Haddii aad doorato inaad sugto wax ka badan 12 bilood ka dib markaad iska diiwaangeliso medicare, ka dib waxaa laga yaabaa inaad bixiso ku darista LHC oo kuu wehelineysa ceymiskaaga. Haddii aad ka yar tahay 31 markaad timaado Australiya si kastaba ha ahaatee, ka dib wakhtiga ugu dameeya ee LHC wuxuu la mid noqonayaa qof kasta oo kale (1 Luulyo ee ku xigta dhalashadaada 31naad.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caymiska caafimaadka gaarka ah waxaa laga heli karaa ama waxaad warqad u soo qori kartaa:

Website: www.privatehealth.gov.au

Iimeyl: privatehealth@health.gov.au

Warqad u qor: MDP 954
Department of Health and Ageing
GPO Box 9848
CANBERRA ACT 2601
AUSTRALIA

Shaqaalaynta Australiya

Suuqa shaqada ee Australiya waa mid aad u loolan badan. Shaqada Australiya waxay ku xiran tahay qododba dhaqaale, nooca shaqada ee aad dooneyso xaalado gaar ah oo laga yaabo inay waxyeeleeyaan jiritaanka shaqo ee qaybo ka mid ah dalka. **Ogolaanshaha inaad soo haajirto ma damaanad qaadayo shaqo**, xitaa dadka codsi soo gudbista ee lagu qiimeeyo inay khibrad sare leeyihiin.

May 2011, heerka shaqo la'aanta Australiya wuxuu ahaa 4.9%. Soogalootiga ku dhashay dalalka Ingiriiska lagaga hadlo waxay leeyihiin heer shaqo la'aaneed oo ah qiyaastii 4.1%, meesha kuwa ku dhashay dalalka kale shaqo la'aanteedu ay gaarsiisan tahay heerka shaqo la'aanta 6.1%. Soogalootiga yimid Australiya ilaa 2006 waxay qaban shaqo la'aan gaarsiisan heerka 7.6% (macluumaadka asalka). Guud ahaan Soogalootiga ay ku qaadato wakhti badan oo ay ku degaan Australia waxay leeyihiin heer shaqo la'aaneed oo hooseeya. Waxaa la mid ah kuwa ku soo galay Australia Xirfadle ahaan oo leh heerar shaqo la'aaneed oo ka hooseeya kuwa ku soo galeyaha hababka kale.

Si aad u ogaato helitaankaaga shaqo, akhri wargeysyada Australiya ee liisgareeya shaqooyinka bannaan. Waxaa sidoo kale jira website – do kale oo badan oo shaqooyin bixiya.

Intaadan soo aadin Australia waa inaad ogaataa inay la xiriirto shuruudo ama xaalado gaar ahi nooca shaqa ee aad dooneyso inaad ka shaqeyso. Shaqooyin badan Australiya gudaheeda dadka araajida soo qoranayaa waa inay awoodaan inay iska diwaan geliyaan ama liisan ka qaataan Haa'yada Dowlada gobolka ama territoryga ee Australiya, iyo /ama inaad xaq u leedahay xubin ka noqoshada urur shaqo aqooneed ama mihnadeed.

Waa inaad ogaataa inay shaqadaadu u baahan tahay isdiiwaangelin ama laysan. Dadku kugu tiirsan sidoo kale waa inay sameeyaan weydiimo la mid ah oo ku saabsan shaqadooda, haddii ay doonayaan inay shaqo raadsadaan isla markay yimaadaan iyo haddii kaleba.

Soogalootiga aan shaqeyn waa inay iska diwaangeliyaan Centrelink isla markay yimaadaan. Maadaama badanaa soogalootiga dhawaan yimidi xaq u lahayn lacagaha Wasaarada damaanada bulshada ilaa 104 toddobaad. Waxay laga yaabaa inay xaq u yeeshaan adeegyada taagerida shaqo raadinta ee ay maalgeliso dawladu oo xadidan waxayna ka helayaan Adeegyada Shaqada ee Australiya. Si kastaba ha ahaatee, soogalootiga leh degenaansho joogto ah oo oofiya shuruudaha kale waxaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan inay dalbadaan way awoodaan inay isticmaalaan adeegyada Adeegyada Shaqada ee Australiya.

Adeegyada shaqada, macluumaadka aqoonsiga xirfada iyo shaqa raadinta, waxaa laga heli karaa goobahan website-dada soo socda:

- JobSearch ka Australiya (macluumaadka ku saabsan shaqada , shaqooyinka laga yaabo inay soobaxaan, xirfad yaraanta iyo shaqada Australiya dhexdeeda) www.jobsearch.gov.au
- Goobta Shaqada ee Australia (wixii macluumaad ah ee ku saabsan Goobta shaqada ee Australia) www.deewr.gov.au
- Ictiraafka Xirfadaha ee Australiya (wixii ictiraafid aqoonsi shaqo ah) www.deewr.gov.au/tra
- Xafiiska Qaranka ee Aqoonsiga Xirfadaha Dibada NOOSR (ictiraafka xirfadaha iyo aqoonsiga dibeda) **www.immi.gov.au/asri**

Cashuurta Australiya Gudaheeda

Australiya,cashuur ayaa laga bixiyaa lacagtaad ka qaadato shaqo, ganacsi ama maalgelin.

Xafiiska Cashuurta ee Australiya wuxuu ka ururiyaa cashuur shakhsiyaadka iyo ganacsiyada si ay ugu bixiyaan adeegyo muhiim ah oo bulshadeed sida isbitaalada, dugsiyada, wadooyinka iyo wadooyinka tareenka.

Shakhsiyaadka iyo cashuurta

Haddii aad shaqeyso, loo shaqeeyahaagu wuxuu si otumaatiga uga geynayaa cashuur mushahaarkaaga ama lacagtaada. Dhammaadka sannad xisaabeed kasta, waxaad ku xareynaysaa cashuur celin xafiiska cashuurta u tusaya intaad qaadaatay iyo inta cashuur ah ee aan ka goynay lacagtaada. Waxaa laga yaabaa inaad awoodo yareynta cashuurta adoo dalbanaya waxyaalaha cashuurta dhima iyo yareeyaba.

Ka hor intaadan bilaabin shaqada, waa inaad ka dalbataa Lambarka Faylka Cashuurta (TFN) Xafiiska Cashuurta. TFN waa lambar gaar ah oo la siiyo shakhisyaadka iyo ururada si loo aqoonsado iyo ujeedooyin diiwaan heyn ah. Haddii aadan lahayn TFN, loo shaqeeyahaagu waa inuu ka gooyaa lacagta ugu badan ee la cashuuri karo lacagta lagu siiyey. Waa muhiim inaad TFN ku heyso meel xafidan. U ogolaanta qof kale inuu isticmaalo TFN, iibinta ama siinta waxay kuu keeni kartaa dhibaatooyin khatar ah..

Ganacsiyada iyo cashuurta

Haddii aad ka fekeraysid inaad ku qabsato ganacsi Australiya, waxaad u baahan doontaa TFN iyo Lambarka Ganacsiga Australia (ABN). Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad iska diiwaangeliso Cashuurta Adeegyada iyo Alaabta (GST) haddii lacagtaada sanadkii ay ka badato AUD75,000. Waxaad u baahan doontaa inaad ka bixiso cashuur dakhliga ganacsigaaga waxaana laga yaabaa inaad lacag ka bixiso faa'iidooyinka hantida weyn kaa soo gala haddii aad iibiso ganacsiga ama hantida.

Sharciga Australiya sidoo kale wuxuu u baahan yahay qof kasta oo aad shaqaaleyso inaad cashuur ka qaado qof kasta oo shaqaale ah mushahaarkiisa oo aad u soo dirtaa Xafiiska Cashuurta.

© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2011

Wixii macluumaad dheeraad ah

Si loo caawiyo in ganacsiyada iyo shakhsiyaadku fahmaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda cashuureed, Xafiiska Cashuurtu wuxuu bixiyaa caawimaad badan iyo waxyaalo ku caawinaya. Tan waxaa ka mid ah Ingiriis iyo daabacaado luuqadeed ee kale, siminaaro, macluumaad interneetka ah iyo booqashooyin lays hor fariisanayo. Xafiiska Cashuurtu wuxuu soo saarey wax soo gudbin bilaash ah oo la yiraahdo "Cashuurta Australiya – waxaad u baahan tahay inaad ogaatid' oo lagu helayo DVD ama interneetka 'Cashuruta Australiya' wuxuu bixinayaa macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan nidaamka cashuurta. TFNs, xareynta cashuurta dakhliga iyo wax intaas ka badan. Waxaa lagu heli karaa 15 luuqadood oo uu ku jiro Ingiriisku.

Wixii macluumaad dheeraad ah:

Website: www.ato.gov.au

Taleefan: 132 861 (Australia gudaheeda)

Iimeyl: diversity@ato.gov.au

Adeegyada Dejinta Soogalootiga

Wasaaradda Socdaalka iyo Dhalashadu waxay maalgelisaa adeegyo badan oo degitaan ujeedadooduna tahay caawinta soogalootiga iyo kuwa ku soo galay deeqda bini'aadanimo inay ka noqdaan ka qaybgalayaan firfircoon bulshada Australia dhexdeeda sida ugu dhakhsaha badan ka dib markay yimaadaan.

Barnaamijka Deeqaha Dejinta

Barnaamijka Deeqaha Dejinta (SGP) wuxuu u qasdayaa inuu caawiyo soogalootiga xaqa u leh iyo qaxootigu inay noqdaan kuwo iyagu isku tashada iyo inay ka qaybgalaan si siman bulshada Australia sida ugu dhakhsaha badan ka dib markay yimaadaan.

Wasaaradda Socdaalka iyo Dhalashada waxay ku maalgelisaa sanduuqeeda Barnaamijka Deeqaha Dejinta ururada aan faa'iida doonka ahayn iyo wakaaladaha dawlada ee adeegyada bixiya si ay u siiyaan caawimaada dejinta macaamiisha xaqa u leh.

Waxaad ka heli kartaa adeegyada hoos yimaada Barnaamijka Deeqaha Dejinta haddii aad tahay degene joogta ah oo aad ku timid Australia 5-tii sanno ee ugu danbeysay:

- Soogale bani'aadanimo
- Soogalooti qoys ahaan ku yimid oo heerka Ingiriiskiisu hooseeyo
- ku tiirsanayaasha soogalootiga xirfadeed ee jooga goobaha gobolada ama baadiyaha ee heerka Ingiriiska hoose ah leh.

Qaar ka mid ah degenayaasha ku meelgaarka ah (Guur la filayo, ninka aan wali la aqoonsan, sayga aan weli la aqoonsan iyo kuwa isku tiirsan ee fiisaha sita ee aan weli la aqoonsan iyo kuwa ku tiirsan) goobaha gobolada iyo baadiyaha ee leh aqoon Ingiriis oo hooseysa ayaa sidoo kale xaq u leh adeegyada Barnaamijka Deeqaha Dejinta.

Adeeg bixiyayaasha Barnaamijka Deeqaha Dejinta waxay ku siin karaan macluumaad ah sidii ay u isticmaali lahaayeen adeegyada dadweynaha sida guriyeynta, xannaanada caruurta, shaqada iyo dugsiga. Waxay sidoo kale ku siin karaan xiriiro iyo netwaagyada taageerada oo laga yaab inay ku caawiyaan inaad bulshada dhex degto.

Adeeg bixiyayaasha Dejinta Bulshada ee kuugu dhow waxaad laga heli karaa **www.immi.gov.au/living-in-australia/settle-in-australia/find-help/where-to-help/**

Barnaamijka Ingiriiska ee Dadka waaweyn ee Soogaloogtiga ah

Ingiriis barashada waa mid ka mid ah tallaabooyinka ugu muhiimsan ee ugu horeeya ee aad qaadi karto si aad ugu degto Australia si guul ah iyo gaarida ujeedooyinkaaga shakhsiyeed, bulsho iyo dhaqaaleba. Haddii aad xaq u leedahay Barnaamijka Ingiriiska ee Dadka waaweyn ee Soogaloogtiga ah (AMEP) ayaa ku siin kara barida afka Ingiriiska ee aasaasiga ah oo bilaash ah kaana caawin doona inaad maareyso xaaladahaaga bulsho maalmeedka ah iyo waxoogaa xaaladaha shaqada ah.

Haddii aad u qalanto AMEP, waxaad baran kartaa Ingiriiska ilaa 510 saacadood, ama ilaa aad ka gaarto Ingiriis aad isticmaali karto, mid alaale midkii soo hor mara. Haddii aad tahay qof ku soo galay deeq bani'aadanimo oo soo maray waxyaalo sida jir dil ama dhib ka hor intaadan Australiya iman, ama haddii aad soo qaadatay waxbarashada dugsiga ee caadiga ah, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad hesho casharo Afka Ingiriiska ah oo intaas ka sii badan.

Waa inaad iska diiwaangelisaa fasalada AMEP ee adeeg bixiyahaaga AMEP 6 bilood gudahood markaad timaado Australia ama aad hesho deganaashaha joogtada ah. Waa inaad ka dib bilowdaa fasalada hal sanno gudahood sida ugu dhakhsaha badan, waxaanad helaysaa 5 sanno inaad ku dhameyso fasalada. Wakhtiyadan go'an marmarka qaarkood waa la kordhin karaa xaalladaha qaarkood.

AMEP waxay bixisaa habab kala duwan oo aad wax ku baran kartid. Waxaad fasal dhigan kartaa wakhti dhan ama wakhti dhiman, waxaad wax ku baran guriga adoo isticmaalaya fogaan Wax ku barashada AMEP ama Ingiriiska aayaad ku carbin kartaa iyadoo macalin guriga kuugu imanayo. Haddii aad leedahay carruur ka yar wakhtiga dugsiga waxaa lagu siinayaa xannaano carruureed bilaash ah intaad fasalka ku jirto.

La xirriir laynka weydiimaha ee Wasaaradda Socdaalka iyo Dhalashada ee 131 881, ama gal website ka **www.immi.gov.au/living-in-australia/help-with-english/amep/** si aad u ogaato haddii aad Ingiriis ka baran kartid AMEP iyo meeshii aad iska diiwaangelin lahayd.

Adeegga Turjumaadda Afka iyo Qoraalka ee (TIS National)

Haddii aad u baahan tahay inaan la xiriirto qof aan ku hadlin luuqadaada, TIS National ayaa ku siin karta turjumaano 24 saac maalintii, 7 maalmood toddobaadkii. Waxaad ka wici kartaa TIS National 131 450. bedel ahaan, wasaaradda dawlada, ganacsiga ama adeega bulshada aad dooneysid inaad la hadashid ayaa wici karta TIS National iyagoo ku metelaya.

TIS National waxay ku shaqeysaa ujro ka qaadid ciddii ay adeeg u qabato, si kastaba ha ahaatee, xaaladaha badidooda kharashka shaqada turjumaanka waxaa bixiyey wasaarada dawlada, ganacsiga ama adeega bulshada aad la hadlayso.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan markaad arkeyso dhakhtar, waxaad weydiin kartaa dhakhtarku inuu kala xiriiro TIS National Khadka Mudnaanta Dhakhtarka. Farmashiiyada laftigoodu waxay isticmaali karaan turjumaanka taleefanka. Tani waa adeeg bilaash ah oo la siiyo dhakhaatiirta iyo farmashiilayaasha.

TIS National waxay soo dhaweynaysaa weydiimaha muwaadiniinta iyo deganayaasha joogtada ah ee Australia ee xiisaynaya inay noqdaan turjubaano qandaraas ku shaqeeya si ay ugu qabtaan adeega ah turjubaanimada xubnaha bulshada Australia. Haddii aad leedahay aqoon fiican oo Ingiriis iyo ugu yaraan af kale, waad ka fekeri kartaa codsiga noqoshada turjubaan qandaraasle ah oo la shaqeeya TIS National. Fadlan kala xirriir Sarkaalka Xiriirka Turjubaanka Qaranka TIS National 1300 132 621 wixii macluumaad dheeraad ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada ay bixiso TIS National waxaa laga helayaa **www.immi.gov.au/tis**

Turjumaada qoraalka ah ee dukumiintiga shakhsiyeed ee la xirriira dejinta (tusaale, shahaadooyinka dhalashada ama guurka, laysanka baabuurta, dukumiintiga shaqo iyo waxbarasho) oo loo turjumayo Ingiriis ayey helayaan soogalootiga xaqa u leh 2 sanno gudahood markay yimaadaan Australiya ama la siiyo deganaanshaha joogtada ah. Tani waa adeeg bilaasha ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan turjumaada qoraalka ah waxaa laga helayaa **www.immi.gov.au/living-in-australia/help-with-english/learn-english/client/translation_help.htm**

© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2011

Barnaamijyada Ingiriiska ee Wasaaradda Waxbarashada, Shaqada iyo Xirriirka Goobta shaqada

Afka Ingiriiska, tababarka farbarashada iyo tiro barashada waxaa sidoo kale laga heli karaa barnaamijyo la wajahayo oo ay maamusho Wasaaradda Waxbarashada Shaqada iyo Xirriirka Goobta shaqada (DEEWR) iyo dawladaha Gobolka iyo Territoriga. DEEWR waxay leedahay 2 barnaamij oo tirobarasho iyo farbarasho, ee afka Ingiriiska ee loogu talagalay macaamiisha jira da'da shaqada (15-64).

Tan kowaad waa Barnaamijka Afka, Tirobarashada iyo Farbarashada (LLNP) oo bixiya ilaa 800 oo saacadood oo bilaash ah ee ah afka ku jiheysan mihnadaha, tababarka tirobarashada iyo farbarashada ee shaqo doonka xaqa u leh. LLNP waxay raadineysaa inay hagaajiso afka macaamiisha iyo/ama xirfadaha tirobarashada iyo farbarashada si looga caawiyo inay helaan shaqo ay heysan karaan ama ka sii doonan karaan waxbarasho dheeraad ah iyo tababar. Barnaamijka wuxuu sidoo kale bixiyaa tababar khaas ah oo loo sii marsiinayo Tababar xoojin ah oo loo sameeyey si uu u taageero macaamiisha fursada xun. Qaar kamid ah shaqo doonka ee leh qaybaha fiisaha ee la xulay waxaa laga yaabaa inaysan xaq u yeelan barnaamijkan.

Tan labaad waxaa weeye Barnaamijka Farbarashada iyo barashada Ingiriiska Goobta shaqada (WELL) oo siiya maalgelin ururada si ay u tababaraan shaqaalaha Australiyanka ah afka Ingiriiska, xirfadaha tirobarashada iyo farbarashada si ay uga caawiso iyaga inay fuliyaan baahidooda hadda iyo ta mustaqbalka ee shaqada iyo tababarka.

Dawlda Australiya waxay sidoo kale maalgelisaa si ay u caawiso Dawlada Gobolka iyo ta Territoriga iyo hay'adaha waxbarashada ee dawliga aheyn si ay u bixiyaan Ingiriis barasho degdeg ah oo la siinaya ardeyda soo galootiga dhawaan yimid ee xaqa u leh ee dugsiga sare iyo hoose dhexe oo hoos imanaysa Ingiriiska Afkii labaad ahaan- Barnaamijka Dadka Dhawaan yimid (ESL-NA). Barnaamijku waxay ujeedadiisu tahay inuu hagaajiyo fursadaha waxbarasho iyo natiijo ee ardeyda dhawaan timid ee ka soo jeeda asal ahaan meel aan Ingiriis lagaga hadlin iyadoo la horumarinayo heerkooda Ingiriis iyo u fududeynta ka qaybgalkooda nashaadka waxbarashada dugsiyada caadiga ah.

Ardeyda xaqa u leh waxaa laga rajeynayaa inay ku qaataan ugu yaraan 6 bilood oo Ingiriis barasho degdeg ah midkood xarumaha afka Ingiriiska/ guryaha ama dugsiyada. Hay'ad kastaa waxay masuul ka tahay inay sameysato qiimeyn ay iyadu leedahay oo lagu qiimeynayo baahida ardeyga, sida manhajka Ingiriiska Luuqo Labaad ahaan, iyo bixinta Barashada Afka Ingiriiska oo degdeg ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah:

Website: www.deewr.gov.au
www.deewr.gov.au/skills/pages/default.aspx

Taleefan: 1300 363 079

Dhalashada Australiya

Deganayaasha joogtada badidoodu ee doonaya inay noqdaan muwaadin waa inay fuliyaan shuruudaha ka hor intaysan dalban dhalashada. Shuruudahan waxaa ka mid ah ku noolaanshaha Australia wakhti go'an iyo inaad dhaqankaagu wanaagsan yahay. Markaad fuliso shuruudahan waxaad sameyn kartaa codsi dhalashada Australiya. Dadka badidiisu ee soo codsada dhalashada Australiya waxaa sidoo kale laga rabaa inay ku gudbaan imtixaanka dhalashada.

Macluumaadka ku saabsan qaadashada dhalashada Australiya, faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan shuruurada degenaanshaha, shuruudaha kale ee xaq u yeelashada iyo foomamka codsiga, waxaa laga helayaa websiteka dhalashada ee **www.citizenship.gov.au** ama adoo wacaya khadka macluumaadka dhalashada 131 880 wixii weydiimo ah ee Australiya gudaheeda ah.

Ma u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ama talo.

Hubso inaad hesho nuqulka buugga yar ee *Ka bilaabida Nolol Australia* e. Waxaa lagu heli karaa af Ingiriis iyo 37 luqadood oo bulshooyinku ku hadlaan waxaa laga heli karaa **www.immi.gov.au/living-in-australia/settle-in-australia/beginning-life/**

Macluumaadka degitaanka waxaa sidoo kale laga heli karaa xafiisyada Wasaaradda Socdaalka iyo Dhalashada ee Australia iyo dibeda wixii macluumaad dheeraad ah la xirriir:

Wasaarada Socdaalka iyo Dhalashada
Taleefan: 131 881 (weydiimaha guud ee Australia gudaheeda)
www.immi.gov.au

Macluumaadka ku saabsan u soo guurida Australia
www.immi.gov.au/migrants/

Mac uumaad ku saabsan nolosha Australia
www.immi.gov.au/living-in-australia/

Liiska Xafiisyada Socdaalka Dibeda ee Australia
www.immi.gov.au/contacts/overseas/

Meeleeyaha Adeegyada Dejinta
www.immi.gov.au/living-in-australia/settle-in-australia/find-help/where-to-help/

Website ka dhalashada
www.citizenship.gov.au

Wixii macluumaad dheraad ah

Gargaarka degdega Nafgooyada ah
(Dabdemiska, Boliiska, Ambalaasta) – 24 kii saac
Taleefan: 000

Adeega Turjumaada Afka iyo Qoraalka (TIS National)
Taleefan: 131 450
www.immi.gov.au/tis/

Adeega Macluumaad Gobaleedka Dawladda Dhexe ee Australia
Taleefan: 1800 026 222
www.regionalaustralia.gov.au

Website ka Macluumaadka Aqoonsiga Xirfadaha Australiya)
www.immi.gov.au/asri

Aqoonsiga Mihnadaha Australiya
Taleefan: 1300 360 992
www.deewr.gov.au/tra

Website ka dawlada Australia
www.australia.gov.au

Bogga Internetka (Home Page) **www.immi.gov.au**

Khadka weydiimaha guud Wac **131 881** saacadaha shaqada Australiya gudaheeda si aad ula hadashid shantaraalka (macluumaad duuban baa jira saacadahaas wixii ka baxsan). Haddii aad Australiya bannaankeeda jirto, fadlan la xiriir safaaradda Australiya ee kuugu dhow.

© COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2011